AUSCO

# Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

## Ku-xirnaanshaha

Ku-xirnaanshaha bulshadaada waa hab fiican oo kugu caawin kara inaad degto Australia. Ku-xirnaanshaha kooxaha mujtamaca iyo bulshada Australia waxay siinaysaa shabakadda muhiimka u ah dadka ku nool degaankaaga. Dareemidda ku-xirnaanta saaxiibadaada iyo qoyskaaga dibadda jira waxay kaloo qayb muhiim ah ka tahay ka-dareemidda farxadda halkan Australia.

### Bulshada iyo naadiyada mujtamaca

Gobol kasta oo Australia ah wuxuu bixiyaa adeegyada soogalootiga oo kala duwan kuwaas oo taageero bixiya. Waxaa kaloo jira haya'daha bulshada, haya'daha cayaaraha iyo kooxaha bulshada halkaas oo aad kula kulmi doonto dad kale, aadna yeelato waayo-aragnimooyinka cusub ama danihii hore oo socda.

### Maktabadaha

Maktabadaha dadweynaha badanaa waxay leeyihiin waxyaalaha la aqrisado oo luqado badan ku qoran oo adigu aad amaahan karto ama aad maktabadda ku dhex aqrisan karto. Badiba maktabadaha dadweynaha waxay kaloo leeyihiin helidda intarneedka iyo kombiyuutarada lacag la'aanta ah kuwaas oo aad adeegsan karto.

### TV-ga iyo Raadiyaha

Haya'dda Special Broadcasting Service (SBS) waxay sii daysaa wararka TV-ga iyo raadiyaha oo ku baxa luqadaha bulshada oo badan.

### Taleefanada

Wicitaanada taleefanka waxaa laga samayn karaa khadka taleefannada ama kan taleefannada moobaylka ah. Wicitaannada goobaha degaanada waa kuwa ugu raqiisan. Wicitaanka masaafada dheer iyo kuwa dibadda waa qaali. Kaararka taleefanada oo gaar ah waxaa iibiyaa dukaamada qaarkood, sida newsagents-ka iyo suuq-yareyaasha, waxaana loo adeegsan karaa wicitaannada taleefannada dibadda oo raqiisan.

Adeegyada khadadka taleefanada-dhulka ayaad ku xiran kartaa gurigaaga. Waxaa jira shirkado badan kuwaas oo bixiya adeegyada taleefannada. Badanaa waxaad bixin doontaa ujradda xiritaanka markaas ka dibna biil ayey kuu soo dirayaan bil kasta wixii wicitaano oo aad ka samaysay taleefankaas.

Taleefanada mobaylka ah way fududahay in la adeegsado hase ahaatee aad ayay qaali u-noqon karaan. Taleefannada moobaylka waxaa lagu heli karaa qorsheyaal ama kuwa hore loo sii-bixiyey. Khiyaarada hore loo-sii-bixiyey waa kuwa fiican markii aad u baahan tahay inaad xad u samayso intaad lacag ku bixinayso wicitaanada taleefankaaga. Xagga taleefanka moobaylka ee hore-loo-sii-bixiyey hore ayaad u bixinaysaa haddii kale markii kareedhitku kaa dhammaado ma samayn kartid wicitaano ilaa aad gadato kareedhit dheeraad ah. Qorsheyaasha hore-loo-sii-bixiyey waa kuwo fiican marka loo eego miisaaniyad-samaynta maaddaama aadan ku bixinayn wax ka badan waxaad awooddo.

Haddii aad doorato qorshaha taleefanka, waa inaad saxiixdaa heshiis oo aad bixisaa qadar lacag ah bil kasta. Qorsheyaasha badanaa waxay leeyihiin qadar wicitaano ah oo aad samayn karto ayadoo uusan jirin wax qarash dheeraad ah, hase ahaatee haddii aad samayso wicitaano ka badan intii qorshahaagu kuu ogolaa waa inaad bixisaa ujrooyin badan.






## Boostada

Warqadaha iyo baarsalada boostada ayaad ugu diri kartaa cinwaan kasta oo Australia ku yaal iyo badiba meelaha dibadda ah. Istaambooyinka waxaad ka gadan kartaa xafiiska boostada. Qarashka istaambooyinka meelaha dibadda ah wuu ka qaalisan yahay kuwa istaambooyinka ee cinwaannada Australia.

## Intarneedka

Intarneedku waa hab kale oo waxtar leh si aad xiriir usamayso. Si aad guriga ugu adeegsato intarneedka waxaad u baahan tahay inaad haysato kombiyuutar aadna ku xirnaanto intarneedka adigoo usii maraya Internet Service Provider (ISP). Waxaad kaloo ku heli kartaa intarneedka taleefannada smart phones-ka iyo tablets, kuwaas oo aad ufudud in la adeegsado hase ahaatee aad bay qaali u yihiin. Waxaa jira ISPs fara badan dhammaantoodna waxay leeyihiin qorsheyaasha lacag-bixinta billaha ah oo kala-duwan. Waxaa fiican in lala hadlo xoogaa bixiyeyaasha kala duwan si loo arko kan ugu fiican oo kuugu dhaqaale jaban.

Haddii aadan haysan kombiyuutar ama guriga uusan kuugu xirnayn intarneedka markaas ka dib waxaad adeegsan kartaa kombiyuutarka maktabadda agtaada ah oo lacag la’aan ah. Haddii aadan hore u adeegsan kombiyuutar ama aadan aad ugu kalsoonayn adeegsiga kombiyuutarka markaas maktabadda degaankaaga waxay leedahay koorsooyin kaa caawin kara inaad barato kombiyuutarada iyo intarneedka.



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya’dda Caalamiga ee
Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda
Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM